

FAAFINTA  
الرسمية



RASMIGA  
الجريدة

DAWLAD PUNTLAND EE SOOMALIA  
لولاية أرض بونت الصومال

Sanadka 12-aad. Garowe 20 February 2011

Lam.02

Faafinta bil walba soo baxda

جريدة الشهرية

Qaybta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawladda Puntland

Qiimuhu waa Sh.So 10,000 rukun walba . Sanadkii waa Sh.So 170,000 dalka gudihisa, dalka dibaddiisa Sh.So 500,000 rukunka la waydiisto, waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilawdaa 1-da January. Qiimaha qoritaan F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3,000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha barriga ee wasaaradda maaliyadda.

TUSMADA

Qaybta Koowaad

Sharci

Calanka iyo Astaanta Dawladda Puntland

Qaybta labaad

Xeer

Waxba ma leh

Qeybta Saddexaad

Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, lidbeh IWM.

Sharci L.r.02. ee February 20, 2011, kuna saabsan Sharciga Calanka iyo Astaanta Dawladda Puntland



Sharci Lr 09 ee March 27, 2011, kuna saabsan Sharciga Calanka iyo  
Astaan Dawladda Puntland

**Madaxweynaha Dawladda Puntland**

- Markuu arkay :** Dastuurka Dawladda Puntland qodabkiisa  
80-aad;
- Markuu arkay:** Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Summad  
XGGW/DPL/17/2011 ee 17/02/2011.
- Markuu arkay:** Calanka Dawladda Puntland waa afar geesle,  
labada dhinac ee iska soo horjeedaa ay isleg  
yihiin, kana kooban sadex midab oo kala ah:
1. Qeybta sare waa buluug furan, dhexdana  
ku leh xiddig cad oo shan geesle ah,  
madaxyo siman leh, kana turjumaya  
calanka jamhuuriyada Federaalka ee  
Soomaaliya.
  2. Qeybte dhexe waa midibka cadaanka ah  
kana turjumaya nabada Puntland.
  3. Qeybta hoose waa midab cagaaran, kana  
turjumaya barwaaqada iyo kheyraadka  
Puntland.

**Wuxuu soo saaray**

**Xeerkan soo socda:**

**Qodobka 1-aad**


Golaha wakiiladdu waxay ansixiyeen Sharciga Calanka iyo Astaanta  
Dawladda Puntland


**Qodobka 2-aad**

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala keedinayaa Xafiiska  
Madaxweynaha, kan qaryaqaanka guud iyo kan Xoghayaha Golaha  
Wakiilada.

**Qodobka 3-aad**

Dhaqan galka xeerkani wuxuu noqonayaa maalinta 16-aad laga bilaabo  
maalintuu faafinta rasmiga ah ee Dawladda ku soo baxay, kaasoo laga  
baahinayo idaacadaha iyo jaraa'idka muddo 5 (Shan beri ah).

  
**Dr, Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud**  
**Madaxweynaha Dawladda Puntland**




DAWLADDA PUNTLAND

EE SOOMAALIYA

Golaha Wakiillada

Xafiiska Guddoomiyaha



PUNTLAND STATE

OF SOMALIA

House of Representatives

Office Of the Speaker

Ref:- XGGW/DPL/ 17 /2011

Date:- 17/02/2011

Ku:- Madaxweynaha DPL

Garoowe

Ujeedo:- Ansixinta Calanka & Astaanta Dawladda Puntland.

**GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADA:-**

MARKUU ARKAY:-

Dastuurka DPL Qodobkiisa 64-aad.

MARKUU ARKAY:-

Soo gudbinta Xeer Madaxweyne Lr, 105 ee  
06/12/2009, ee Guddiga soo xulista Calanka,  
Astaanta iyo Heesta Puntland.

MARKUU TIXGELIYEEY:-

Baahida loo qabo in ay Puntland yeelato Calan  
iyo Astaan u gaar ah.

MARKUU DHEGAYSTAY:- Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiillada ee

22/12/2009.

WUXUU GUDDOOMIYEEY:-

Ansixinta Calanka & Astaanta Puntland.

Allaa Mahad Leh

Cabdirashiid Maxamed Xirsi

Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL

